

# Somaliland Biodiversity Foundation

Diisambar 2024—Warsidaha 11-aad

In this issue

Tifaftirka ............................................1
Goobihii Swayne iyo maanta ................2
Hayaankaygii Sooxeragelinta Yicibta ...4
Cayayaan Diiwaangashan oo tiro ahaan la kordhiyey .................... ...............6
Wararka Ururka ..................................8
Waxtarka tababarrada ku saabsan cayayaanka .........................................9
Hawlaha yaalla! ..................................9

## Hillaadin


Tan iyo kolkiiSBF la asaasay 2016, Ururku wuxuu mudnaanta koowaad siiyay yagleelidda kaydka dhirta ee madxafka kaladuwanaanta noolayaasha ee Jaamacadda Hargeysa. Sannado yar ka hor, waxa lagu kordhiyay qalabkii suuragalinayay kaydka cayayaanka. Inta lagu jiro 2025, waxaannu kaydka dhirta iyo kaydka cayayaanka ka bilaabi doonnaa laba jaamacadood oo kale—Cammuud, galbeedka Soomaalilaand, iyo Burco, badhtanka Soomaalilaan. Laba jaamacadoodba way danaynayaan kaydadka dhirta iyo cayayaanka, isla markaana waxay leeyihiin barnaamijyo firfircoon oo kulliyadaha la xidhiidha.

Ururku waxa kale oo uu maalgelin doonaa tababar 4 maalmood ah oo Feebarweri loo qaban doono wakiillo ka ka la socda saddexda jaamacadood. Ujeeddada tababarku waa iftiimin ku saabsan sida loo wadaago diiwaannada/xogaha kaydadka heer gobol ilaa heer calami, garwaaqsiga mashruucyada aan kharashka badnayn ee la iska kaashan karo, iyo tilmaamidda qiimiga kaydadkan ee heer degmo, heer qaran, iyo heer caalamiba.

Waa barnaamij himilo weyn leh, himilo aad ugu ballaadhan dedaalkayaga ilaa hadda. Si uu u hirgelo, waxaannu codsanaynnaa taageeradaada. In kastaba ha la ekaato e, taageeradaadu waa waxtar. Mikriskoobka lagamamaarmaanka ah deraasaynta dhirta iyo cayayaanka qiimihiisu waa $1000. Dhinaca kale, birqaabka laabku (forceps) waa $3. Si kale haddii loo dhaho, wixii aad ku deeqdaaba waa waxtar. Haddii aad karto, fadlan ka qaybqaado.

*Mary E. Barkworth*

## Geedka tirsigan
### *Xamakow*
### (*Edithcolea grandis*)




Xamakowgu waa geed jaadadka biyaha kaydsada ah oo ka baxa Geeska Afrika, Yaman iyo Sokotra. Xamakowga waxa loogu magacdaray Edith Cole (1859-1940) oo iyada iyo Lort Philips, intii ay ku jireen hawlgalkii dhir sahaminta (1894-1895), ay jaadad dirka Xamakowga ah Soomaalilaan ka ururiyeen 1895. Geedkan afka Ingiriiska waxa lagu yidhaahdaa 'Persian carpet flower'(rooggii Bershiyaanka) taas oo tilmaamaysa qaabka uu u xardhan yahay ee u eg roogagga la falkiyo ee bariga dhexe.

Qoraalka iyo sawirka: *Axmed I. Cawaale*

# Goobihii Swayne iyo maanta

Qoraalka: *Faysal Jaamac Geelle* iyo *Stephen Johnson*; sawirka: *Faisal Jama Gelle*

Intii u dhaxaysay 1887-1893 Kabtan H.G.C. Sweyne, oo ugaadhsade ahaa wuxu booqday goobo kala duwan oo Somaliland ka mid ah, wuxuna buuggiisa ku sifeeyey meelo badan oo goobahaa ka mid ah. November 2024, Faysal Jaamac (SBF) iyo Ismaaciil Xayir (WD&C) oo kaalmo ka heleya machadka Rift Valley waxay dib u booqdeen goobahaas Sweyne hore u sifeeyey. Ujeeddadoodu waxa ay ahayd in la is barbardhigo sifayntii hore ee Sweyne iyo xaaladdooda maanta, iyaga oo waraysiyo qaadaya si ay u fahmaan sababihii ay dabargo'een noolayaashii mar ku badnaan jiray deegaannadaas 140 hortood iyo saamayntii dabargo'aasi ku keenay deegaanka.


Sweyne wuxu qaaday sawirro badan, wuxu sameeyey khariidado wuxuna qoray hadallo uu ku sifaynayo dhirtii, xayawaankii iyo deegaankii uu dhex marayey ee Somaliland. Sifaymihiisu aad uma sii faahfaahsana laakiin waxay sawir ka bixinayaan deegaankii Soomaalilaan ee dabayaaqadii qarnigii sagaal iyo tobnaad. In kasta oo uu ahaa ugaadhsade ku fooggan xayawaanka haddana dhirta wax kooban waa ka qorayey. Xayawaannada uu diiwaangeliyey waxa ka mid ah Cawl, Goodir, Maroodi, Deero, Libaax, Doofaar, Waraabe, Daanyeer. Dhirta uu xusayna waxa ka mid ah: Dacar, Carmo, Qudhac, Xig.

Faysal iyo Ismaaciil keliya waxay dib u booqdeen saddex ka mid ah goobihii uu Sweyne maray, oo aanu midkoodna sawir ka qaadin. Laba ka mid ah, Jaleelo iyo Xunboweyne, waxay ka tirsan yihiin Maroodijeex, halka Xiinweyne oo u dhaw Dalaw ay Saaxil ka tirsan tahay. Goob kasta waayeelka ayey waraysiyo la yeesheen sawirrana way ka qaadeen. Booqashooyinkaa waxa ay sameeyeen Nov. 24-27, kadib doorashooyinkii madaxtooyo ee Soomaalilaan. Waraysiyadii la duubay waxa loo rogay qoraal waana la turjumay. Maqaalkani wuxu daaran yahay kala duwanaanta sifayntii Sweyne ee saddexdaa goobood iyo xaaladdooda maanta. Warbixinta oo dhamaystiran oo ay la socoto falanqaynta faallooyinkii waayeelku waxa la daabici doonaa 2025.

## Jaleelo

**Swayne:** Meel kulul, qallalan oo u dhow dooxa Xunbaweyne. Togga waxa mararka qaar magansada maroodiyada, waxayna ka helaan biyo iyo baad ay ka mid yihiin Carmada, Dacarta iyo Timirtu. Aagga Jaleelo ku hareeraysan waxa qariyay Allaala-cad shareer ah oo jooggiisu illaa 10 fuudh (ilaa 3 mitir) gaadho. Geeda-


Buuraha ku hareeraysan Jaleelo


Hareeraha Jaleelo oo Garanwaagu la wareegay

Sanaagga tuulada ku xeerani waa qudhacyo teelteel ah iyo carro qaawan. Meelo badan, nooca keli ah ee ku hadhsani waa dool sida Garanwaaga (*Neltuma juliflora* [= *Prosopis juliflora*].

# Xunboweyne

**Swayne:** Xunbaweyne waxay ku barbar taallaa togga Isutaggan. Waa tog leh jeex ballaadhan, qallalan, cammuud badan oo ay ku xeeran tahay keyn jiq ah iyo geed hoosaad ay Dacartu ka mid tahay. Dacallada dooxa waxa ku teedsan rucubyo doog ah iyo galshooyin biyo ah, iyo sidoo kale ciid tammuux ah oo garaaryo leh. Dooxa agtiisa waxa ka baxda timir.


Dooxa oo ay ka muuqdaan raadka baabuurtu



Duleedka Tuulada

Maanta dooxu waa xilliyaale, sannadka intiisa badan biyo ma leh, wax yar baana ka sii hadhsan keyntii ku hareeraysnaa. Taa waxa dheer, aagga ku xeeran in badan oo ka mid ah waxa qariyay Garanwaagii. Dacartii weli way ku taallaa, waxa kale oo aad marar arkaysaa geeda timir ah, ha se ahaato ee waxtarkii degaanka bulshadu ku qabtay hoosudhac weyn baa ku yimi.

# Xiinweyne

**Swayne:** Xiinweyne waa dooxo leh laago badan, sanaagyo dhagaxley ah iyo janjeedho kala sarreeya. Aagga ku hareeraysani waxa ku yaalla damallo waaweyn, hadhac ah oo Qudhac u badan, geedgaab laxaad leh iyo tiro dacar ah. Dhirta waxa deday geed-saar leh caleemo qaro cufan leh oo qaabka wadnaha leh. Sanaagga buurta waxa u baadisooc ah geed-gaab iyo dhagaxyo dhadhaab ah. Toggu wuxuu dhex maraa kaamka.


Dooxa qarkiisa


Jidka taga Dalaw, waxa ka muuqda dhir teel teel ah

Maanta, laaggu isma doorin laakiin damalladii waaweynaa ee Qudhacda ahaa wax yar baa kaga hadhsan, kayn-hoosaadkiina waxa ka sii hadhsan geed-gaab. Dacartii iyo saarkii (Carmadii) uu Swayne xusay ilaa hadda way jiraan laakiin sidii ma aha. Marka aad cabbaar u socota tuulada Dalaw waxa muuqanaysa dhul carro qaawan ah, lehna dhir gaagaaban oo teelteel ah, oo qaarkood Qudhac yihiin.

A

*Ka Eeg Bogga 7 Mahadnaqa iyo Tixraaca*

# Hayaankaygii sooxeragelinta Yicibta (*Cordeauxia edulis*)

*Axmed I. Cawaale*



Geed Yicib ah oo koraya Sawirka: *Axmed I. Cawaale*

In ka badan labaatan sano, waxaan ka shaqaynayay koruqaadidda daryeelka degaanka, Soomaalilaan iyo iyo dalalka la deriska ah ee ay Soomaalidu ku nooshahayba. Hal qodob oo walaac weyn leh baa ah noolayaasha qaayaha leh ee khatarta ugu jira in ay dabargo'aan. Taasi waxay igu dhalisay in aan isku dayo degaamaynta noolayaasha qiimiga leh ee gobolka kuwaas oo haddii aan beero, wax ka tari doona nolosha bulshada Soomaalida isla markaana horseedaysa shinni/abuur la iksu hallayn karo si loo tarmiyo jaadnololeedkan. Midhaha Yicibta ayaa xagga hore kaga jira liiskayga noolayaasha jaadkan.

Sannadkii 1907, Yicibtu way ku badnayn degaannadeeda dhaladka ee badhtamaha Soomaaliya iyo bariga Itoobiya. Xitaa 1930 dhirta gobolladaas waxay ka ahayd 50%, haatan se waxa loo arkaa in ay khatar ku jirto (IUCN 2024). Maxaa sababay hoosudhaca Yicibta? In xooluhu aad u daaqaan waxa u dheer abaaraha daran ee soo noqnoqda iyo tarmiddeeda oo hoosaysa. Daaqa xaalufinta ah iyo gurashada aabayeel la'aanta ah ee midhaha Yicibta oo quudasho iyo iibinba loo goosto iyo in laamaheeda la jaro oo xaabo iyo aqaldhis loo adeegsado ayaa sabab u ah hoosudhaca Yicibta. Midhaha Yicibtu booratiinkoodu u ma sarreeyo sida digirta, waxa se ku badan iskudhisyada hodanku ku ah tamarta, sida dux, sonkor iyo tamar. Yicibtu waxay leedahay dhadhan macaan, waana laga doorbidaa timirta iyo bariiska. Sida ay maahmaahdu dhigayso, "fadhi iyo fuud Yicibeed la is la waa".

Sannadihii 1970-nadii iyo 1980-nadii, Wakaaladda Daaqu waxay gobollada dhexe ee Soomaaliya ka samaysay dhawr seere oo daaqa ka caaggan. Taa waxa dheer, badhtamihii 1980-nadii, 50 geed baa laga beeray Xaruntii Cilmibaadhista Beeraha (Central Agricultural Research Station (CARS) ee Afgooye. Dhirtaasi waxay u koreen si gaabis ah laakiin way ubaxaysteen, waxana ka soo go'ay midho badan. Maanta, dedaallo kaa hore la mid ah waxa sameeyey machadka Soomaalida Itoobiya ee Somali Pastoral and Agro-Pastoral Research Institute (SoRPARI). Waxa kale oo daraasado la mid ah laga sameeyey dalal Maraykanku ka mid yahay

Danayntayda degaamaynta Yicubtu waxay ka bilaabantay Soomaalilaan 2004tii, mar aan dhowr geed ku beeray goob aan ka fogayn Hargeisa. Nasiibdarro, geedihii aan beeray midkoodna ma samatabixin. Baadhis danbe waxay muujisay sababtu in ay ahayd lakab dhagax ah oo xayiray aroorka xididdada, suurtagelin waayeyna in biyuhu si fiican ciidda ugu degaan.

Waxaan sameeyay iskuday labaad si aan Yicib u abuuro 2016, aniga oo adeegsanaya siidh ka soo jeedda Badhtamaha Soomaaliya, waxaanan ku beeraty carrasan u dhow Cadaadley, magaalo 90 km bari ka xigta Hargeysa. Is la sannadkaa, waxa kale oo aan tiro geed abqaal Yicib ah ka helay Dr. Muna Ismaaciil oo ka tirsan “The Yeheb Project”, urur aan dawli ahayn oo saldhiggiisu yahay Ingiriiska, kana shaqeeya daryeelka iyo ilaalinta Yicibta. Shan sano ka dib geedihii yaryaraa way ubaxaysteen, waxay se ku fashilmeen in ay midho dhalaan ilaa ay siddeed jirsadeen, badhtamihii 2024! Degaankeeda ay dhaladka u tahay, Yicibtu waxay midho ku yeelataa 4-5 sano.

Illaa hadda waan raadinayaa waxa sababay in midhadhalka Yicibta Cadaadley qaato waqtiga intaa leeg. Waxa qayb ka noqon kara arrimo ekoolajiga iyo carrada la xidhiidha. Marka la eego waxa laga qoray, Yicibtu waxay ka baxdaa joog ah 100–1000 m. Joogga Cadaadley wuxuu ka sarreeyaa 1400, jiilaalkana way ka qabowdahay meelaha kale ee Yicibtu ka baxdo.

Sibtembar 2024, midhihii Yicibta Cadaadley baan ku beeray kiishash 16 × 30 cm ah oo ay ku jirto carrada nafaqaysan ee beertu. 80% way biqleen, marxaladdaa ka dib se 50% baa samataxay. Si kastaba, waxaan rejaynayaa xaqiiqada ah in geedahaygii Yicibta ahaa in ay ku midhadhaleen dhul Soomaaliyeed oo ka duwan kii ay xerudhalanka ku ahaayeen in ay dad kale ku dhaqaajin doonto in ay Yicib ku beeraan degaanno kale oo gobolka ka mid ah iyo, kolka la abuuro hadba shinni cusub oo ka timid Yicib hore, in heli doono noocyo si wacan u la qabsada meelo ka la duwan.

Halkan waxa ku qoran casharradii aan ka bartay beerista Yicibta, wax ka mid ah:

- Daaniyaha iyo Balanbaalista caydiga ah way jecel yihiin siidhka Yicibta! Siidhka/Abuurka aan daloollo muuqda lahayn uun baa la beeri karaa.
- Siidhka Yicibtu wuxuu si wacan ugu baxaa carro furfuran ama isku dhaf nafaqeeyayaal ah oo lagu daray carro luumi ah. Biqilka Yicibtu wuxuu qaataa ilaa laba toddobaad.
- Geedaha kiishka ku biqlaa waxay yeeshaan xididdo aroorsan 30 cm oo degdeg u gaadha gunta kiishka.
- Xididdaasi si fudud bay u waxyeelloobi karaan marka geedkii kiishka laga rarayo ee dhulka lagu abuurayo, sidaas darteed kiishashka ay ku beeran yihiin waa in aanay ka durugsanaan goobta marka danbe looga rarayo. Taa beddelkeeda, shinnida/abuurka, marka horeba, waxa si toos ah loogu ridi karaa dhulka.
- Yicibtu waa geed abaarta u adkaysta kolka ay xididdadiisu dhulka hoose u arooraan, laakiin mar kasta oo biyaha uu geedku helaa bataan midhihiisuna way badanayaan.



Yicibtii oo midho leh Sawirka: *Axmed I. Cawaale*

**Tixraacyo**


Ali, H.M. (1988) *Cordeauxia edulis*: production and forage quality in central Somalia. M.S. Thesis. Oregon State University.

Awale, A.I. (2021) Mapping Useful Trees and Shrubs under Threat in Somaliland. Candlelight for Health, Education & Environment, Hargeysa, Somaliland.

Awale, A.I. (2016) Environment in crisits: selected essays on Somali Environment.

Baumer, M. (1983). Notes on trees and shrubs in arid and semi-arid regions *in* FAO, UNEP. "Notes on trees and shrubs in arid and semi arid regions." EMASAR Phase II, Rome, Italy (1983).

Ismail, M., L. Wallis, & S. Darby. (2015) Restoring land and lives: report of a scoping mission to examine the restoration and possible domestication of the Yeheb plant in Somaliland.


*Eeg Bogga 7*

# Cayayaanka diiwaangashan oo tiro ahaan kordhay!

*Mustafe Abdulkadir Abdurahman*

Warsidihii u danbeeyay, Mary Barkworth waxay ku sheegtay in cayayaanka Soomaalilaan ee GBIF u diiwaangashani yahay 523 keli ah. Aniga oo fulinaya codsigeeda, qaar ka mid ah cayayaanka aan maalin walba arko ayaan sawirro ka qaaday, waanan u diray si ay Internedka ugu faafiso.

Dhammaan sawirradu waxay ahaayeen cayayaanno nool, waxaanan ku qaaday kamaradda moobilkayga. Waxa kale oo aan moobilka u kaashaday ogaanshaha dhigaha iyo loolka iyo joogga goobaha aan sawirrada ku qaaday.

Sawirradaasi hadda waxay ku jiraan web-ka iyaga oo qayb ka ah diiwaanka/kaydka HARGZ-I. Diiwaankan/kaydkan waxa loo asteeyay sawirrada xayawaannada ay diiwaangeliyeen dad Xarunta kalageddisnaanta Jaamacadda Hargeysa ku lug lihi. Ilaa hadda, waxaan Mary u diray sawirrada 14 cayayaan, 11 ka mid ah baana la aqoonsaday.

Waa yaab e, keli ah 13 ka mid ah sawirrada aan u diray ayaa ahaa noocyada Soomaalilaan ee GBIF ka diiwaangashan. Dhammaan waa noocyo Soomaalilaan ka caan ah.

Sawirradii [cayayaannada] aan aqoonsan waayay waxaan u diray degelka iNaturalist aniga oo rejaynaya in ay soo jiidan doonaan xiisaha dadka aqoonta u leh. Ha se ahaato e, waa suuragal in aan noocyo ka mid ah la aqoonsan karin sababta oo ah jiritaan la'aanta sawirro faahfaahsan ama dhinacyo kala duwan ka sawiraya noolaha.

Degelka iNaturalist, magacyada aan ku sheegay cayayaannada qaar baa su'aal la geliyay. Tani waxay iiftiiminaysaa baahida loo qabo samaynta ilo-xogeed wanaagsan si loo aqoonsan karo cayayaanka Soomaalilaan.


Maxaan ka bartay khibraddan? Ugu horrayn, haddii ay tahay in kaydka cayayaannada Soomaalilaan u taagnaado kalageddisnaanta cayayaannadeeda, waa in si kas ah loogu dedaalaa in diiwaanka lagu daro noolayaasha caaddiga ah ee aynnu maalin walba la kulanno/aragno, ma aha uun kuwa goobaha baydhsan doorbida .

Waxa kale oo aan bartay in—fadliga tignoolajiga dijitalka ah ay, marka si loo eego, fududdahay caddayn ku dhisan sawirro oo marag u ah jiraalka nooc gaar ah oo web-ka laga heli karo.

Diiwaannada muunadaha ayaa ka wanaagsan diiwaannada sawirrada ku salaysan, sababta oo ah muunadaha waxa loo dersi karaa si faahfaahfsan. Taasi mararka qaar waa u muhiim in nooc loo aqoonsado si sax ah laakiin, sida aan ogaaday, wax aad u yar baa laga yaqaannaa cayayaannada Soomaalilaan ee xilligan, telefoon kamarad lihi ku filan yahay kordhinta waxa laga og yahay. Tani way rumoobaysaa xitaa haddii aqoonsiga la bixiyay qaar la saxo. Haddii ay taasi dhacdo, diiwaanka HARGZ-I waa la sixi karaa



***Psycoda cinerea* (Duqsi-wasakh)** waa duulaa yar oo laga helo bullaacadaha, musqulaha, iyo goobaha kale ee qoyaanka ah. Wuxuu dadka qaar ku keenaa xasaasiyad neef-qabataw ah.



***Halyomorpha halys*** (Kutaan-bunni), waa cayayaan quuta dhir ka la duwan, maalintiina firfircoon. Si uu isu difaa-co, wuxuu soo daayaa ur silloon.



***Lepisma saccharinum*** (Maar u eeke) waa habeennoole baalallaawe/ garboole ah. wuxuu dheefshiidaa cellulose-ka, waxaanu dadka qaar ku sababaa xasaasiyad iyo mushkilado neefmareenka ah



***Lucilia sericata* (Duqsi-Cagaar)** waa duqsiga jaadkiisa waaweyn ee saxarada lagu dul arko. Wuxuu mararka qaar sababaa shuban. Halkan wuxu dulsaaran yahay caleen Saytuun .



***Ephestia kuehniella*** (Xaydhaweyn) waa cayayaanka dalagga firileyda ah. Waa habeennoole. Midhkan waxa soo jiitay iftiinka laambadda wajahadda aqalkayga.



Kani wuxuu ka mid yahay sawirrada la geliyay iNaturalist. Waa balanbaalis, waxa se magacaa wadaaga kudhowaad 2,300 nooc oo ka la duwan! Run ahaan loo ma aqoonsan karo jaadkiisa hoose, marka la eego sawirkanna laga yaabee xitaa in aan loo aqoonsan karin heer genus, laakiin in iNaturalist lagu faafiyaa waxay innaga caawin kartaa aqoonsigiisa.

## *Ka yimid bogga 3-aad*

### Mahadcelin

Deraasaddan ballaysinka ah waxa suuragalisay deeq kooban oo ka timi mashruuca 'Local Histories of Climate Change in the Horn of Africa' ee Jaamacadda Pennsylvania, iyo taageerada shaqaalaha Machadka Rift Valley.

### Tixraac:

Swayne, H.G.C. (1895) Seventeen trips through Somaliland: a record of exploration and big game shooting, 1885 to 1893. Rowland War and Co., Ltd., The Jungle, Picadilly. Sidoo kale si bilaash ah looga heli karo isaga oo ebook halkan, at https://www.gutenberg.org/files/57907/57907-h/57907-h.htm and from Amazon in multiple formats.

## *Ka yimid bogga 5-aad*

Prieto-Garcia, J. M., Ismail, M., Cattero, V., Amrelia, M., Darby, S., & Evans, F. (2022). Climate Change in the Horn of Africa Drylands: Domestication of Yeheb as a Climate-Smart Agricultural Mitigation Strategy to Protect the Regional Food Chain. In *Handbook of Climate Change Across the Food Supply Chain* (pp. 111-130). Cham: Springer International Publishing.

Söderberg, V. (2010). The importance of yeheb (Cordeauxia edulis) for Somali livestock production and its effects on body tissues when fed to Swedish domestic goats. M.S. Thesis. Swedish Univ. Ag. Sc.

# Wararka Ururka

## 2024

Warsidihii hore ka dib, hawlqabadyada  Ururku waxa laga akhrisan karaa maqaallada ay qoreen Faysal Jaamac Geelle iyo Stephen Johnson iyo Mustafe Cabdiqaadir Cabdiraxmaan.

Dennis and Jon Herlocker waxay sawireen [scanned] ka dibna qaab online ah ku faafiyeen warbixino dhawr ah oo ku saabsan dhul daaqsimeedkii woqooyiga Soomaaliya (dhulka imika ah Somalland + Puntland). Hoos u raac lifaaqan si aad ula degto warbixinahaas.

## 2025

Sida ku xusan Bog 1, sannadkii 2024 waxa la qaatay go'aan muhiim u ah baahida loo qabo xarumo badan oo u xilsaaran diiwaangelinta iyo daraasaynta kalageddisnaanta jaadnololeedyada Soomaalilaan. Sidaas daraaddeed, horraanta 2025 Ururku wuxuu soo gadan doonaa agabka loo baahan yahay si uu diiwaanka/ kaydka dhirta iyo cayayaanka ugu bilaabo jaamacadaha Cammuud iyo Burco. Kayd walba marka la bilaabo, waxa laga diiwaangelin doonaa degelka OpenHerbarium (dhirta), OpenZooMuseum (xayawaanka), GrSciColl (kaydadka oo dhan), iyo, marka kaydku gaadho 50 muunadood oo si hagaagsan u faahfaahsan in lala wadaago GBIF.

Hawlqabadyada kale ee qorshaysan waxa ka mid ah:

- Soo saarista layliskii u horreeyey kadib marka la baahiyo diiwaanka afarta nooc ee geedka gobka iyo ku fidsanaantiisa dhulka Soomaalilaan.
- Soo saarista carin la xidhiidha hawlaha wasaaradda deegaanka iyo isbeddelka cimilada ee dhanka ‘Dhir beerista’.
- Maalgelin-u-raadinta shir ay hawlwadeennada iyo ardayda saddex jaamacadood [Cammuud, Hargeysa, iyo Burco] iyo ururrada kale ee Soomaalilaan kaga hadlayaan sida kor loogu qaadi karo kaalinta muwaaddiniinta ee daryeelka iyo maamulka kalageddisnaanta jaadnololeedyada Soomaalilaan.
- Horumarinta websaydka Ururka, sida ku kordhinta xogo badan oo lala degi karo iyo cusboonaynta bogagga dhaxalka waxqabad ee ururka.

*Mary E. Barkworth*

# Waxtarka tababarrada cayayaanka

Labadii tababar ee ay horseedka ka ahayd Dr. Tharina Bird, waxay ka mid ahaayeen hawlqabadyada ugu guusha weyn ee Ururka. Labada tababar waxa ka qaybgalay 31 arday—16 sannadkii hore, 15 sannadkan ah. Ta ka sii muhiimsan, ardaydu waxay la laabteen dardar ay u qabaan wixii ay barteen, doonista in ay sii korodhsadaan, iyo hammi ah taakulaynta aqoonkorodhsiga dad kale.

### Mahadsanid, Tharina!

Tababarka 2024 waxa lagu qabay Xarunta Dhiroonka Geed Deeble. Iyada oo aan laga dalban, Hadiya Tababarka 2024 waxa lagu qabtay Xarunta Dhiroonka Geed Deeble. Iyada oo aan laga dalban, Hadiya xmed Biixi, oo ka mid ahayd kaqaybqaatayaashii tababarka, waxay ii soo dirtay warbixin ay ka qortay tababarka. Waxay muujinaysaa qiimaha siminaarrada jaadkan ah. Sababta oo ah oggolaanshaheeda, warbixintaa waxa laga daalacan karaa websaydka ururka. Natiijooyinka kale ee tababarkan labaad [2024]:

- Samaynta WhatsApp Group ay ku danaynayaan xoojinta dhismaha kaydka cayayaanka ee Jaamacadda Hargeysa, dhexgalka mashruucyada cilmibaadhiseed iyo horumarinta agabka waxbarasho ee cayayaanka Soomaalilaan.
- Koox ay ka go'an tahay diiwaangelinta kalageddisnaanta noole ee cayayaanka xarunta Geed Deebleh.

Isbarashadii aniga iyo Mustafe Cabdiqaadir, baraha maadada cayayaanka ee Jaamacadda Hargeysa. Maqaalka bogga hore ku qoran, iyo samaynta barta HARGZ-I GBIF waa midhihii ka dhashay isbarashadaas.

Ka hor intii aanay Hadiya ii soo dirin warbixinteeda, ardayda waxaan guruubka WhatsApp ku weydiiyay su'aalo ku saabsan tababarka cayayaanka. Waxay bixiyeen jawaabo isku mid ah, in kasta oo ay ka gaagaabnaayeen kuwii warbixinta Hadiya: Ka mahadsheegashada aqoonta iyo xirfadaha ay tababarka ka taransadeen ee ku saabsan cayayaanka, kalageddisnaantiisa iyo daraasadihiisa. Ururku wuxuu u halgami doonaa sidii uu dedaalkooda u taageeri lahaa, In wax laga hagradaana waa doqonnimo .

# Hawlaha badan ee yaalla!

Xagaagii dhowaa, waxaan kaashaday GBIF si aan magacyada cilmiga ah iyo liiska cayayaannada Soomaalilaan ugu daro Open-ZooMuseum. Waxaan ka naxay koobnaanta jaadadka Soomaalilaand ee u diiwaangashan GBIF: 50 qoys, 189 jilib iyo 214 nooc. Laga bilaabo maalintaas, magacyo badan baa lagu soo daray, waxa se jira qaar kale oo badan oo ay tahay in lagu daro.

Mushkiladdu waa xogta ku saabsan noocyada/jaadadka Soomaalilaan oo aad u kala filiqsan. Google Scholar waa degel muhiim u ah helidda cilmibaadhisaha, laakiin abuuridda liiska cayayaanka Soomaalilaan ayaa ah hawl muhiim ah.

**Muxuu muhiim u yahay cayayaanku?**

Liiska cayayaanku wuxuu fududaynayaa samaynta kaabayaasha aqoonsiga, wuxuuna dhiirrigelinayaa diiradda saarayaa bayoolajiga noocyada liiska ku jira, sida ogaanshaha goorta iyo goobaha ka la duwan ee ay ugxantooda dhigaan, lammaanuhu is soo jiitaan (qooqaan) iyo waxa ay cunaan. Waxa suuragal ah jawaabaha su'aalahaasi in ay ka talabixiyaan siyaabaha loo dhiirrigelin karo cayayaannada waxtarka leh is la markaana looga gaashaaman karo kuwa waxyeellada leh. Intaaba ka sokow, magacyada waxa loogu baahan yahay xidhiidhka [si la isu la garan karo]. Waxa taalla qabyo badan, ay ku jirto diyaarinta agabkii dhisme, kii aqooneed iyo kii dadeed ee hawlahan lagu fulin lahaa. Laakiin hirgelinta hawshaasi waa shaqo socota!